

Lr:12

AAFINTA
الرسمي



RASMIGA

الجريدة

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA
ولاية أرض بونت الصومال

Garoowe 13 Disember 2000

Lr 12 biS

جريدة الشهرية

2aad

LAWFINTA BILWALBA KA SOORAXDA

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland
waa Sh.So- 10,000 lamber walba Rukuunka Sannadkii waa Sh.So- 170,000 dalaka
dibaddana waa Sh.So-500,000-Rukuunka la waydiiisto waqtiga loo gooyay wixii ka
jira ee jansayo. Qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So- 3,000
kuna iyo Qoritaanka waxa la waydiiista Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah,
waxa lagu bixiyaa xafiiska canshureaha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.

TUSMADA

Qeybta 1-aad
Sharci

Sharci Lr.18 ee 14/12/2000, kuna saabsan Horumarinta Jidadka & Gegooyinka
Dayuuradaha.

Sharci Lr.19 ee 14/12/2000, kuna saabsan Mammuucidda & Saaridda Miinada Iyo
waxyaabaha qarxa.

Sharci Lr.20 ee 14/12/2000, kuna saabsan Qaamimka Biyaha, Tamarta & Kheyraadka
Dabuciga ah.

Qeybta 2-aad
Xeeri

Waxba ma leh

Qeybta 3-aad



DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

PUNTLAND STATE OF
SOMALIA

XAFIISKA MADAXWEYNAHA

OFFICE OF THE PRESIDENT

Sharci Lam 20 ee 14/12/2000

Garoowe, Disember 17, 2000

Kuna saabsan qaanuunka Hay'adda Biyaha, Tamarta & Khayraadka Dabiiciga

MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND,

MARKUU ARKAY Axdiga Dawladda Puntland,

MARKUU TIXGELIYEY Ansixinta Golaha Wakiillada ee ku cad warqadda
sumadeedu tahay GW/81/2000 ee taariikhdeeduna tahay Disember 15, 2000,

WUXUU SOO SAARAY

Qaanuunkaan soo socda:

Qodobka 1^{aad}.

Qaanuunkan dhismaha iyo khidmadda adeegga ee Hay'adda Puntland waa la ansixiyey.

Qodobka 2^{aad}.

Saddex nuqul oo qaanuunkan ka mid ah ee Madaxweynuhu saxiixay iyo lifaaqiisa waxaa loo qaadanayaa asal (Original), waxaana lagu kala kaydinayaa Xafiiska Xoghaynta Madaxweynaha hal nuqul, Xafiiska Xoghaynta Golaha Wakiillada hal nuqul, Xafiiska Garyaqaanka Guud hal nuqul, waana lagu faafinayaa.

Qodobka 3^{aad}.

Qaanuunkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyaan. Madaxweynuhuna saxiixo, waxana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda, wuxuuna qaanuunkani ka mid noqonayaa qawaaniinta dalka Puntland, qofkastana waxaa ku waajib ah in uu dhawro

Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Madaxweynaha Dawladda





DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

PUNTLAND STATE OF
SOMALIA

XAFIISKA MADAXWEYNAHA

OFFICE OF THE PRESIDENT

Sharci Lam _____

Garoowe, Disember 17, 2000

MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND,

MARKUU ARKAY Axdiga Dawladda,

MARKUU YAQIINSADAY Baahida loo qabo hawlgalka Hay'adda Biyaha, Tamarta & Khayraadka Dabiiciga,

WUXUU XEERIYEEY:

I) SHARCIGA DHISMAHA HAY'ADDA "PSAWEN"

Qodobka 1^{aad}

Waxaa la dhisay Hay'adda Puntland ee Biyaha, Tamarta & Khayraadka Dabiiciga oo markii la soo gaabiyo la orandoono PSAWEN (Puntland State Corporation for Water, Energy & Natural Resource).

Qodobka 2^{aad}

Xarunta Hay'adda waa magaalo madaxda Dawlad Goboleedka Puntland ee Garoowe, waxayna laamo & xafiisyo ku yeelanaysaa gobolada Puntland sida; Garoowe, Boosaaso, Gaalkacyo, Qardho, Baran iyo Buuhoodle.

Qodobka 3^{aad}

Hay'addu waa hayad dawladeed oo madax banaan lehna shakhsiyada qaynuuneed, waxayna hoos timaadaa Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland.

Qodobka 4^{aad}

Ujeedada hay'addu waa: -

- a. Horumarinta adeegyada la xiriira Biyaha, Tamarta & Khayraadka Dabiiciga ee Puntland.
- b. Ka haqab tirka Biyaha iyo Tamarta magaalooyinka iyo tuulooyinka.
- c. Daraasadda & heshiisyada ku saabsan khayraadka dabiiciga ah ee Puntland.
- d. Diyaarinta heshiisyada ay DPL dhinac ka tahay, kuna saabsan Biyaha, Tamarta iyo Khayraadka Dabiiciga.

Qodobka 5^{aad}

Hay'addu waxay leedahay guddi maamul oo ka kooban 9 xubnood, waxaana lagu magacaabayaa Dekreeto Madaxweyne, kadib markuu soo jeediyo Guddoomiyaha hay'adda (CEO).

Guddiga maamulka (BOD) waa mas'uuliyeenta ugu sareeya ee Hay'adda, wuxuuna awood u leeyahay: -

- a. Dejinta iyo aragtida iyo istaraariiyada Hay'adda.
- b. Xulashada, magacaabidda & shaqo ka saaridda saraakiisha sar sare ee Hay'adda.
- c. Xadidida qaabka Hay'adda.
- d. Dejinta siyaasadda Hay'adda, iyadoo la tashanaya Madaxtooyada.
- e. Dhaqaale abuuridda Hay'adda (Fund Raising).
- f. Magacaabidda Hanti-dhawrka.
- g. Ansixinta miisaaniyadda Hay'adda.

Qodobka 6^{aad}

- a. U bedelidda aragtida Hay'adda barnaamij cayiman oo la dhaqan gelin karo.
- b. Fulinta hawl-maalmeedka Hay'adda.
- c. Kala talinta Guddiga Maamulka arrimaha la xiriira horumarinta.
- d. Diyaarinta miisaaniyadda & maaraynta dhaqaalaha.
- e. Diyaarinta warbixinada iyo hawlaha la xiriira waxqabadka shaqaalaha.

Qodobka 7^{aad}

Guddiga Maamulka (BOD) wuxuu shirarkiisa qabanayaa bishiiba hal mar, wuxuu kale oo yeelanayaa shirar aan caadi ahayn marka loo baahdo.

Qodobka 8^{aad}

Hay'addu waxay ka helaysaa dhaqaalaha: -

1. Deeqda ay dawladdu siiso ama hantida ay dawladdu u qoondayso.
2. Kaalmada Hay'adaha caalamiga ahi u fidiyaan.
3. Adeegyada ay qabato dakhliga ka soo gala.

Qodobka 9^{aad}

Dawladda Puntland waxay u fidinaysaa Hay'adda canshuur dhaaf la xiriira qalabka, adeegyada Biyaha, Tamarta & macdanta muddada shanta sano ah ee hore.

Qodobka 10^{aad}

Arrimaha aan ku xusnayn sharcigan Hay'adda waxaa lagu dhaqayaa sharciyadii dawladihii hore ku saabsanaa wakaaladaha madaxa banaan ee Dawladda oo aan ka hor imaanayn Axdiga iyo sharciyada kale ee Puntland.

Qodobka 11^{aad}

Shaqaalaha waxaa lagu dhaqayaa heshiis wadareed ee ay la galaan Hay'adda wixii aan ku xunayn.

II) Khidmadda Adeegga ee Hay'adda


Qodobka 12^{aad}

1. Surtax u dhigma 10% tariifada dawladdu ka qaado soo dejinta matoorada qalabka iyo aaladaha ku shaqeeya shidaalka iyo korontada.
2. Canshuurta Hay'adda NESHA "Levy" iyo sutax d/hoose ay ka qaataan shidaalka soo daga oo dhan Sh. So 35,000 in PSAWEN laga siiyo ugu yaraan saami dhan Sh. So 5,000 (Shan kun) fuustadii.
3. Surcharge dhan Sh. So 100 (Boqol) lagu siyaadiyo guud ahaan (public and private installations) qiimaha halkii KWT ama wax u dhigma markii qiimuhu yahay forfeit korontada la isticmaalo.
4. (Safety fee and registration) in kharash diiwaan galin iyo badbaadin dhan Sh. So 200,000 (Labo boqol oo kun) lagu dabakho matoorada gaar ahaan loo isticmaalo (Warshadaha, hoteellada, garaashyada iwm), quwadooduna ay ka sarayso 50 KVA.
5. In kharash diiwaan galin iyo badbaadin u dhexeeya Sh. So 500,000-150,000 lagu dabakho matoorada quwadoodu ka hooseyso 50 KVA, iyadoo loo eegayo sida ay u kala killo-watt badan yihiin.

6. Surtax la saaro dhuxusha isticmaalka gudaha ee dhan Sh. So 300 (Sadex boqol) kiishkii.
7. Surcharge la saaro ceelasha (Riigagga) miyiga ee dhan Sh. So 500/MC.
8. Surcharge la saaro ceelasha leh isticmaalka ganacsi ama warshadaha iwm ee dhan Sh. So 1,000/MC.
9. Kharash diiwaangelin dhan Sh. So 24,000 (Labaatan iyo afar kun) shandkii oo la saaro biyaha ceelasha leh isticmaal gaar ahaaneed.

Qodobka 13^{aad}

Qaanuunkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyaan Madaxweynuhuna saxiiso, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah.


Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Madaxweynaha Dawladda

